# Dalabka bedelka gunooyinka snap maadaama oo uu ka lumay qoyska ama xatooyo gunada oo elektoroonig ah oo timid

## Waxa aad heli kartaa lacagtaada SNAP qaar in laguugu shubo kaadhkaaga EBT hadi aad wakhti hore dalbato.

**Miyaad la kulantay:**

1) **Qoyska oo uu ka lumay?** Tusaalayaasha waxaa kamid ah:

- Daad
- Dab
- Duufaan
- Qalab shaqayn waayay (talaagada ama qaboojiyaha)
- Laydhka oo guriga ka bakhtiyay oo guri kaliya saameeyay
- Laydhka oo guriga ka bakhtiyay oo degmooyin badan saameeyay

Fadlan buuxi *"Qaybta A:* Kaga Warbixi Cuntada Aad Wayday" foomka bayaanka, saxeex **oo** kusoo celi **10 maalmood gudahood marka ay cuntu kaa xumaatay ama wayday.**

2) **Xatooyo gunada elektorooniga ah?** Tusaalayaasha waxaa kamid ah:

- Jabsasho kaadhka
- Xaniban kaadhka
- Iimeel, fariimo qorala ah ama taleefano tuugo
- Hawlo khiyaano oo lamid ah

Fadlan buuxi *"Qaybta B:* Kaga Warbixi Xatooyada Gunada Elektorooniga ah" foomka bayaanka, saxeex **oo** kusoo celi **30 maalmood gudahood marka ay cuntu kaa xumaatay ama wayday.**

Hadii kaadhka la jabsaday si elektoroonig ahaan ah fadlan waxa aad usoo sheegtaa sidii kaadh la xaday si markaa wixii guno ah ee ku hadhsan looga ilaalin karo tuugada mustaqbalka. Si aad u joojiso kaadhkaaga fadlan qabo onleyn ahaan EBT edge (www.ebtedge.com) ama kala hadal EBT edge 1-888-997-4447.

## Ku dalbo si laguugu bedelo gunooyinkaaga SNAP taleefanka, si foolka-fool ah, iimeel ahaan ama boosta:

| | |
|---|---|
| **Taleefanka:** | 1-800-699-9075 ama 711 (TTY) |
| **Si foolka-fool ah** (ka eeg xafiiska deegaanka): | Oregon.gov/dhs/Benefits/Pages/index.aspx |
| **Iimeel ahaan:** | Oregon.Benefits@odhsoha.oregon.gov |
| **Boosta** (waa in la helayaa inta ayna mudadu dhaafin): | ONE Customer Service Center<br>PO Box 14015<br>Salem, OR 97309 |

**Ku hel foomkan qaab kale:** Kala hadal ONE Customer Service Center 1-800-699-9075 si aad warqadan ugu hesho luuqado kale, far waawayn, farta indhoolka ama qaab aad adiggu dooranayso. Waxa aad sidoo kale dalban kartaa turjubaan. Kaalmadani waa bilaash. Waxa aan aqbalnaa sidoo kale adeega gudbinta taleefanka.

Oregon Department of Human Services

SNAP Supplemental Nutrition Assistance Program
Putting Healthy Food Within Reach

100-53546_ DHS 0349D (10/2023) Somali

Oregon Department of Human Services

Taariikhda la gaadhsiiyay ODHS:____________________

Lambarka kiiska: ____________________

Magaca kiska: ____________________

# Bayaanka Dalabka Bedelka Gunooyinka SNAP

(Si aad u dalbato bedelka cuntada la waayay qoyska oo ay masiibo la kulantay darteed ama xatooyada gunada elektorooniga ah ee SNAP)

***Qoraalka loogu talo geley shaqaalaha ODHS:** Fadlan raac QRG-ga Bedelka SNAP si aad uga shaqayso dalabyadan.

**Qaybta A: Ka warbixi cuntada la waayay qoyska oo masiibo la kulmay darteed**

Loo isticmaalaa ka warbixinta cuntada la waayay ee lagu iibsaday gunooyinka SNAP ee ka timaada masiibo qoyska ku dhacday. Fadlan u qor shay kasta oo cunto ah iskii. Raaci magaca, goobta cuntada marka masiibadu dhacday (talaagad, barafeeye, kaydka, imw.), iyo xadiga aad ka bixisay.

**Nooca dhacdada:**____________________ **Taariikhda dhacdada:**____________________

| Magaca shay kast aoo cunto oo baaba'ay iyo tiradeeda | Meesha ay cuntadu taalay markii ay waxyeeladu soo gaadhaysay | Lacagta la bixiyay |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |

**Qaybta B: Warbixinta xatooyo gunada elektorooniga ah**

Isticmaalka warbixinta gunooyinka SNAP ee si elektoroonig ah lagu xaday iyada oo loo marayo hawlo khiyaano. Fadlan ku dar xogta aad ogtahay oo dhan ee ku saabsan dhacdo kasta.

Ma waxa aad dhibane u tahay xatooyo gunada elektorooniga ah? ☐ Haa ☐ Maya

Miyaad haysatay kaadha EBT wakhtiga xatooyadu dhacday? ☐ Haa ☐ Maya

Taariikhda dhacdada: ____________________

Xadiga la xaday: ____________________

Macluumaadka dheeraad ah: ____________________

____________________

____________________

____________________

**Saxeexayga foomkan wax auu muujinayaa, in aan fahamsanahay in hadii aan bixiyo xog been ah, in la igu ciqaabi karo oo ay noqonayso in aan gudo gunooyinka bedelka la ii siiyay.**

Saxeexa: Taariikhda

Waxa aad ku heli kartaa waraaqahan luuqado kale, far waawayn, farta indhoolka ama qaab kale si bilaash ah. Kala xidhiidh Xarunta Adeega Macmiilka ONE 1-800-699-9075 Waxaan aqbalaynaa dhammaan wicitaannada adeegga Relay

**Bayaanka la dagaalanka takoorka**

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) ma takoorto dadka. Tani waxay ka dhigan tahay in ODHS ay ka caawiso dhamaan dadka u qalma oo ayna ula dhaqmin si kale cidna maadaama da'dooda, qoomiyadooda, midabkeeda, meesha ayna kasoo jeedo, jinsigeeda, diinteeda, aragtideeda siyaasadeed[1], laxaad la'aanteeda, ama rabitaankeeda jinsiga.

Waxa aad xarayn kartaa cabasho hadii aad u aragto in ODHS ay kuula dhaqantay si ka duwan waxay doonto ha noqotee sababtu e.

Si aad ugu xarayso cabasho gobolka, waxa aad kala hadli kartaa Xafiiska U Ololaynta Badhasaabka 1-800-442-5238 (TTY 711) ama waxa aad ugu diri kartaa xafiiska warqad:

Governor's Advocacy Office
500 Summer Street NE, E17
Salem, OR 97301

**Iimeel:** GAO.info@odhs.oregon.gov

Sida uu dhigayo sharciga xuquuqda madaniga ah ee federalku iyo shuruucda iyo siyaasadaha xuquuqda madaniga ah ee Waaxda Beeraha Maraykanku (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah inay dadka ku takoorto qoomiyad, midab, meesha uu kasoo jeedo, jinsiga (waxaa kamid ah aqoonsiga jinsiga iyo rabitaanka jinsiga), diinta, laxaad la'aan, aragtida siyaasadeed[1], ama jawaab celin ama aar goosi cabasho xuquuq madani oo hore.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado kale oo aan ahayn Ingiriisi. Dadka qaba laxaad la'aanta ee u baahan qaab kale oo ay wax u sheegaan si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (sida, farta indhoolka, far waawayn, cod duuban, Luuqada Dadka Dhagaha La' ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'ada (gobolka ama deegaanka) ee meesha ay ka dalbanayaan gunooyinka. Shakhsiyaadka dhagaha la', dhagaha culus ama qaba laxaad la'aanta hadalka waxay kala xidhiidhi karaan USDA Adeega Gudbinta Federalka 800-877-8339.

Si aad u xarayso cabashada takoorka barnaamijka, Cida cabanaysaa waa inay buuxiso Foomka AD-3027, Foomka Cabashada Takoorka Barnaamijka USDA oo waxaa laga heli karaa: https://www.usda.gov/sites/ default/files/documents/ad-3027.pdf, xafiis kasta oo USDA ah, iyada oo lala hadlayo 833-620-1071, ama iyadoo warqad loo dirayo USDA. Warqada waa inuu la socdaa magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka, cida cabanaysaayi oo lagu qoraa sharaxa talaabada takoorka ee la sheegayo iyada oo faahfaahsan si loogu sheego Xog Hayaha Xuquuqda Madaniga ah (ASCR) nooca iyo taariikhda xad gudubka xuquuqda madaniga ah la sameeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqada waa in loo gudbiyaa:

**Boosta:**
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama

**Fakiska:** 833-256-1665 ama 202-690-7442; ama

**Iimeel:** FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

**Hay'adan waa bixiye fursad loo siman yahay.**

1 Macaamiisha SNAP waxaa laga ilaaliyay in lagu takooro waxay aaminsan yihiin.